

2007-2008 Qaabka Badalaada Rafcaanka

Su'aaladaha & Jawaabaha



Akhbaarahaan soo socdo waa tixraaca *diawaangalinta hadda ee sanad dugsiyeedka 2007-2008* laga bilaawo Sabteembar 17, 2007 ilaa Juun 2008.

Aniga kuma qanacsani dugsiga ubadkayga dhiganaayo—Maxaan sameeyn karaa?

Tilaabada koowaad waa inkala hadal xubnaha shaqaalaha Xarunta Diiwaangalinta “Enrollment Center (EC)” ama Xarunta Qoyska Labada Luqad “Bilingual Family Center (BFC)” si ay muraajacad ugu sameeyaan xaaladaha gaarka ah. Waxayna ku xiran tahay waqtiga sanadka iyo xaaladaada, dib u diwaagalinta iyo/ama u xalin ku qorida liiska sugitaanka Haddii heerka qaynuunka badalaada diwaangalinat oonan u siineeynin natiijo ku qalmato, *muraajacad Hogaaminta Khilaafka Qoraal Kooban iyo Rafcaanka* iyo/ama la-tasho shaqaalaha diwaangalinat si ay kuugu qeexaan qaabka ugu fiican baahidaada loo fasiraayo.

Badalaada rafcaanka maxaa ugu baahanahay aniga in aan sameeyo hadda?

Haddii aad doorato qaabka badalaada rafcaanka, waxaa heli kartaa *Foomka Codsiga Dacwada/Badalaada Rafcaanka* waxaa ka qaadan kartaa “downloading” goobta shabakada Dugsiyada dadweynha Seattle www.seattleschools.org ama ka codsiga foomanka goobahaan: EC, the BFC, ama dugsiga ubadkaada ku qoran yahay. Akhri tilmaanta bixiyaha (foomka). Buuxi foomka oo dhan una dir (iyo dokumentiga haddii loo baahdo) dugsiga ubadkaada dhiganaayo. Diyaarso in aad la kulanta Maamulaha Dugsiga si aad ugu falanqooda arimaha ku quseeyo

Aniga kuma qanacsani in aan la hadlo Maamulaha Dugsiga. Miyaa la hadli karaa cid kale?

Xaaladaha intooda badan, Maamulaha Dugsiga wuxuu u xilsaarayaa shaqaalaha kale dugsiga in ay kula hadlaano adiga. Waxayna noqon kartaa Ku-xigeenynka Maamulaha Dugsiga, La-taliyaha Dugsiga, ama, U Adeegaha Cawino Qoyska.

Miyuu Maamulaha Dugsiga go'aaminayaa badalaada ubadkayga ama maya?

Maya. Maamulaha Dugsiga ma go'aami karo go'aanka rafcaanka. Maamulaha Dugsiga waxaa looga baahan yahay in oo buuxiyo diyaarinta tilaabooyinka hore rafcaankan. Waxaa kaloo Maamulaha Dugsiga la weydiinayaa talooyinka kana mid ah qorshaha ardayga faragalinta dugsiga ku qoran yahay ama (xaaladaha qaarkood) dugsiga cusub.

SOMALI

Qofkee baa go'aaminaayo badalaada rafcaanka ?

Arimaha rafcaanka haddii lagu xalin waayo heerka dugsiga waxaa loo soo gudbinayaa xafiiska maamulka xarunta dhexe goobtaas oo laga helo khabiirada ku takhasusay awoodna u leh faragalinta maamulka meelo fara badan (sida Waxbarashada Gaarka ah, nabadgalyada iyo ilaalinta, Diiwaangalinta, iyo Howlaha Caafimaadka). Hogaaminta Agaasimayaasha oo la shaqeeyo Maamulaha Dugsiga waxay hubinayaa in la soo buuxiyey dhamaan tilaabooyinka looga baahan yahay heerka dugsiga iyo waxayno ku cawinayaan khayraad dheeraad ah. Waxqabadka dheeraadka ah ee Maaulaha iyo Hogaaminta Agaasimayaasha waxaa muraajaco lagu sameeynayaa go'aanka rafcaanka iyadoo la abuurayo qaybo lagu qeexaayo arday kastaba rafcaanka oo u gaarka kali ahaan.

Maxay tahay fursadaha aan ku guulaysan karo rafcaanka?

Inta badan, waxaa lagu xaliyaa dhibaataada iyo arimaha ku quseeyo heerka dugsiga ardayga dhiganaayo. Dhibaatooyinka xaaladaha adag ayaa loo tixgalinayaa badalaada. Badalaada rafcaanka ee dugsiga ma loo ansixinaayo iyadoo saldhig looga dhigaayo jaceelka manhajka ama gaadiidka kugu haboon. Ilaa mooyee xaalado waafaqsan gaynuunka, badalaada ma loo ansixinaayo xaaladaha qoyska qoyska ay soo bandhigaano, dhacdo xaqiiq ah, ama xaalad qoyska quseeyso kuna *waajib ah* sida: xanaanada caruurta; waxqabadka xili dugsiga ka dib; balamada aanan dugiga quseeyn; iyo caafimaadka xubnaha qoyska.

Inmisaa muddo ah ayey qaadaneysaa badalaada rafcaanka ?

Muddada way kala duwanaan kartaa. Xaaladaha intooda badan, Maamulka Dugsiga waxaa looga baahan yahay in oo soo cadeeyo tilaabooyinka la fulinaayo in lagu xaliyo dhibaataada ka hor inta loo soo gudbin shaqaalaha xafiiska xarunta dhexe. Goorta lagaala falanqooda arimaha ku quseeyo laguuna sheego rafcaanka, Maamulaha Dugsiga wuxuu kuu sheegayaa qiyaasta muddada ay qaadaneeyso ama loo baahan yahay.

Sidee baa natiijooyinka akhbaaraha aan ku helayaa?

Guud ahaan, natiijooyinka rafcaanka waxaa lagu soo dirayaa boostada adareeska waalidka/wakiilka. Xaaladaha qaarkood, shaqaalaha xarunta way ku soo wacayaan si ay kaala falanqoodaan ikhtiyaarka diiwaangalinta (doorashada dugsiga, taariikhda la bilaawaayo, iwl) ka hor qo'aanka ugu dambeeyo.

Maxaan sameeynayaa haddii rafcaakayga la ansixin?

Go'aanka badalaada rafcaanka waa go'aanka ugu dambeeyo. Hase ahaatee, waalidka iyo wakiilada waxaay codsan karaan in dib loo furo haddii ay keenaano akhbaaro cusub oo la tixgalinaayo.